

# Maxaa la sameeyaa haddii baaritaanka degdegga ah\* uu muujiyo in lagaa helay COVID-19?



*'Baaritaanka degdegga ah waxaa sidoo kale loo yaqaan 'baaritaanka unugyada difaaca jirka'.*

- Iskarantiil isla markaasba.
- Waxaa kula soo xiriiri doona shaqaale ka socda Coronaopsporing. Sidoo kale waa lagusoo dhaweynayaa inaad kala xiriirto Coronaopsporing **telefoonka. 32 32 05 11.**
- Qado *dabagalka baaritaanka PCR* sida ugu dhakhsaha badan ugu macquulsana. Waxaad ballansan kartaa baaritaanka **coronaprover.dk**
- Ha isticmaalin gaadiidka dadweynaha oo xasuusan inaad xirto maaskarada wajiga ku suntan calaamadda CE marka aad aadayso xarunta baaritaanka PCR

## Maxaan ugu baahanahay baaritaanka PCR marka tijaabada degdegga ahi muujiso in laiga helay COVID-19?



- Baaritaanka PCR wuxuu xaqiijin karaa ama ka reebi karaa in baaritaanka degdegga ah uu bixiyay natiijada saxda ah.
- Baaritaanka PCR wuxuu kaloo muujin karaa haddii aad qabtid nooc kamid ah noocyada fayraska. Sidan oo kale, mas'uuliyiintu waxay kormeeri karaan faafitaanka noocyo la xushay.
- *Haddii baaritaankaaga dabagalka PCR uu yahay mid laga helay cudurka*, waa inaad sii wadataa iskarantiilida. Akhri wax dheeraad ah **www.sst.dk/selvisolation**

## Maxaan sameeyaa haddii baaritaanka PCR aan laga helin cudurka?

- *Haddii baaritaankaaga dabagalka PCR uu yahay mid aan laga helin cudurka*, oo aadan lahayn wax calaamado ah, waad joojin kartaa iskarantiilida. Raadinta xiriir ayaa sidoo kale la joojin karaa, sidaa darteed dadka aad isku dhow tihin waxay joojin karaan is-karantiilida,, umana baahna mar dambe in la baaro. Waxaad ku wici kartaa Coronaopsporing **telefoonka 32 32 05 11** fwixii talo ah ee ku saabsan joojinta raadinta xiriirada.

## Baaritaanada waa kaliya sawirka ka soo baxa xaaladda caabuqa.

Baaritaano - baaritaannada degdegga ah iyo baaritaannada PCR-ka waa sawir keliya oo ah haddii aad qabtid COVID-19 waqtiga baaritaanka. Sidaas darteed waa muhiim inaad sii wado raacitaanka tilmaamaha si looga hortago faafitaanka cudurka - sida kala fogaanshaha bulshada, ilaalinta nadaafadda gacmaha iyo joogitaanka guriga haddii aad leedahay astaamo - iyadoo aan loo eegin natijada baaritaankaaga.

**Ka aqri wax badan oo ku saabsan baaritaanka fayraska cusub ee corona [sst.dk/coronatest](https://sst.dk/coronatest)**

**13 Abriil 2021**